

# CITY OF SAINT PAUL

## OGEYSIISKA SHAQAALAHA

Sharciyada Mushaharka ugu Yar iyo ESST waxay khuseeyaan shaqaalaha ka shaqeeya gudaha xuduudaha juquraafiyeed ee Saint Paul

### Jirrada Kasbasha leh iyo Waqtiga Keydka


#### Maxaad u isticmaali kartaa ESST?



Jirro maskaxeed ama jireed oo soo wajahda naftaada ama xubin qoyska ah, oo ay ku jirto daryeelka caafimaadka ee ka hortagga ah



Sababaha la xiriira rabshadaha guriga, xadgudubka galmada, ama gaadmo



Xiritaanka dugsiga ama shaqada ay sabab u tahay soo gaadhid caabuq



Daryeelka xubin qoyska ka mid ah oo xanaano maalmeedkiisi uu u xirmay si lama filaan ah

#### Sideed u ururin kartaa una isticmaali kartaa ESST?

- Shaqaaluhu waxay ururiyaan 1 saac oo ESST ah 30-kii saacadood ee kasta oo la shaqeeyay
- ESST waxay bilaabataa ururinta maalinta 1<sup>aad</sup> ee shaqada shaqaalaha waxaa loo oggol yahay inay isticmaalan ESST-ga la kasbaday 90-ka maalmood ee ugu horreeya shaqada (haddii loo shaqeeyahaagu aanu lahayn siyaasad ka dabacsan oo ESST ah).
- Loo-shaqeeyayaashu waa inay u oggolaadan shaqaalaha inuu helo ugu yaraan afartan iyo siddeed saacadood oo ah jirro kasbasha leh iyo waqti keyd ah sannad kasta iyo beddelka waqtiga jirrada iyo keydka ee aan la isticmaalin ilaa 80 saacadood kadib sannadka ugu horreeya ee shaqaalaha.
- Dukumeenti ayaa la codsan karaa maqnaanshiyaha ka badan 3 maalmood.

### Aarsigu waa sharci darro

### Korodhka Mushaharka ugu Yar

Mushaharka ugu yar ee Saint Paul waxa loo cusbooneysiya sannadle

Xajmiga Ganacsiga	Mushaharka ugu Yar 2022	Mushaharka ugu Yar 2023
Aad u balaadhan 10,001 + shaqaale	\$15.00	\$15.19 laga bilaabo Janaayo 1
Balaadhan 101-10,000 shaqaale	\$13.50	\$15.00 laga bilaabo Juulay 1
Yar 6-100 shaqaale	\$12.00	\$13.00 laga bilaabo Juulay 1
Aad u yar 5 shaqaale ama ka yar	\$10.75	\$11.50 laga bilaabo Juulay 1

### Diwaangeli Xadgudub

Haddii aad aaminsan tahay in lagu xadgudbay xuquuqdaada ESST ama Mushaharka ugu Yar, Waxaad cabasho u xarayn kartaa HREEO adigoo isticmaalaya mid ka mid ah hababkan:



WAC: 651-266-8966



IIMAYL:  
LaborStandards@stpaul.gov



BOOQO websaydkeena:  
[www.stpaul.gov/laborstandards](http://www.stpaul.gov/laborstandards)

Shaqaaluhu sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay keenaan dacwad madani ah haddii ay rumaysan yihiin in lagu xad-gudbay xuquuqdooda ESST ama mushaharka ugu yar

*Af-celin luqad, tarjumaad, iyo meelayn ayaa la heli karaa marka la codsado*



**SAINT PAUL**  
HUMAN RIGHTS & EQUAL  
ECONOMIC OPPORTUNITY

City of Saint Paul  
Department of Human Rights & Equal Economic Opportunity  
Division of Labor Standards Enforcement and Education  
15 W Kellogg Blvd, Suite 280, Saint Paul, MN 55102